# Kala madhitaanka/kala soocida Qashinka



## Qashiak Guriga – goobta aad dagamtahay



Sanduuqa cagaaran.

Isku day in hadhaaga cuntada aad sifiican afka uga xidhid!

Ha ku ridin dhuxul ama danbas kulul Sanduuqa qashinka.

Labadi asbuucba mar baa qashinka la qaadi.

## Waraaqaha, Kartoomada iy caagaga – goobta aad dagamtahay



Saduuqa cagaaran oo calaamada Buulaga ah daboolaka ku leh waxaa ku ridaa;

Waraaqaha iyo Kartoomada: joornaalada, buugaagta, Buugaagta jeebka, kartoomada caanaha, kartoomada Pizza-da iwm.

Caagaga& Bacaha: Nadiifi bacaha raashinka ku dahaadhan, bacaha lagu adeegto, caagadaha cabitaanka iwm ku rid bacda wayn. Bacda si fiican u xidh dabadeedna ag dhig saduuqa waraaqaha lagu rido.

Qashinka noocan ah waxaa la qaadi 4-tii asbuucba hal mar.



Ulleberg Wold

## Dhalooyinka, Gasacadaha/daasadaha, Dharka – xarunta dib u celinta gee

Waxaad ka helaysaa xarunt dib u celinta meelo badan oo u dhow meesha aad degantahay. Dhalooyinka iyo daasadaha waxaa lagu ridaa sanduuqyada loo calaamadeeyay. Dharka iyaga oo nadiif ah waxaa lagu ridaa sanduuqa dharka loogu talo galay.








## Qashinka intiisa kale – xarunta dib u isticmaalka gee





Qashinka intiisa kale – xarunta dib u isticmaalka gee
Xarunta dib u isticmaalkawaxaad gaysaa waxii kale ee qashin ah; biraha, qashinaka khatart ah, talaajadaha, Allaabaha korontada isticmaala, allaabta guriga, xaabka geedaha iwm.
Miyaad ka shakisantahay wax walba meesha lagu ridayo?
Markaa waxaan kugu talin lahayn inaad booqatid bogga internett-ka **www.fosenrenovasjon.no** ama **www.sortere.no**

Fosen Renovasjon

Shirkada Qashinka ee u dhaxaysa degaaanda kala ah: BJUGN, RISSA, ØRLAND iyo ÅFJORD